# DAAWADA CUDURKA QAAXADA

Developed by the
Minnesota Department of Health,
Tuberculosis Prevention and Control Program
August 2002 phone: (612) 676-5414

This is one in a series of four patient education pamphlets that addresses TB to be used in various clinical situations.

**Medicine for Tuberculosis Disease, Somali**

# DAAWADA CUDURKA QAAXADA

Takhtarkaagu waxaa uu kuu qoray daawo ka disha jeermiska qaaxada.

**Cudurada Qaaxada waa la daaweyn karaa**

Cudurka qaaxada waxaa lagu daaweyn karaa adigoo qaata daawada disha jeermiska qaaxada, laakiin jeermiska waa uu xoog badan yahay. Waxaad u baahan tahay in aad daawada bilo badan aad qaadataa si loo hubiyo in dhammaan jeermiskii uu dhintay. **Daawdaada waa in aad u qaadataa sidii uu takhtarka kuugu qoray.**

Waxaa dhici kara dhowr todobaad kadib in aad fiicnaato, laakiin waa in aad sii wadaa daawadaadi si aad u bogsato.

Haddii aad qaadashada daawada markiiba iska dayso, jeermiska qaaxada wali waa uu nool yahay wuxuuna noqon karaa mid intii hore ka xoog badan.
Waxaad u baahan doontaa daawo tii hore ka xoog badan oo disha jeermisyadan xoogga badan.

**Qaado dhamaan daawooyinkaaga**

Daawada qaaxada sida badan wax khatar ah ma leh, lakiin mararka qaar waxay leedahay waxyeelo (side effects). **Haddii aad wax calaamadahan ah isku aragtid waa in aad sida ugu dhaqsi badan u wacdaa ama aad u aragtaa dhakhtarkaaga:**

- cunno xumo
- matag
- calool xanuun
- labo-labo
- indhaha iyo maqaarka oo hurdi (jaalo) noqda
- faraha gacmaha iyo kuwa lugaha oo jiriricooda
- kabuubyo ama jiririco afka agagaarkiisa
- aragga caad kaa fuulo ama aragtidaada ay badalanto.
- dhagaha ay ku dhawaaqayaan
- maqalka uu kaa lumo
- dawakh (wareer)
- cuncun kalagoysyada ah (xibno xanuun)
- qandho (ku haysay) in ka badan saddex maalmood
- firiiric kasoo yaaca jirka.
- dhiig bax iska yimaada
- nabaro iska soo baxa

Takhtarkaagu waxaa uu kuu qorayaa daawooyinka soo socda:

**___Isoniazid (INH)**
**___Rifampin***
**___Pyrazinamide (PZA)**
**___Ethambutol**
**___Streptomycin**



(Steotomashiinta waxaa

* Rifampin waxaa uu leeyahay wax yeelooyinka soo socda:

- Kaadida, calyada, ama ilmada midabkooda waxaa uu ka dhigaa oranji. Murayadaha isha dhexdeeda lagasho (soft contact lenses) waxaa laga yaaba in ay wasakhaystaan (midab bar ah yeeshaan).

- Maqaarkaaga waxaa laga yaaba in uu dhibsado cadceeda, ee iska qari cadceeda (isticmaal sunscreen) daboolna meelaha maqaarka cadceeda ka gaarayso.



- Waxaad u baahan doontaa daawo tii hore ka xoog badan oo disha jeermisyadan xoogga badan.Waxaad u baahan doontaa daawo tii hore ka xoog badan oo disha jeermisyadan xoogga badan.

- Kaniinyada kala dheereynta dhalmada awood ma leh markii aad qaadanayso daawada Rifampin. Dumarka isticmaalaya daawada rifampinka waa in ay qaataan nooc kala ee daawada kala dheeraynta dhalmada ah**.**

**U sheeg takhtarkaaga wixii ku saabsan dhamman daawooyinkaad aad qaadato markaa.**

**U sheeg takhtarkaaga haddii aad uur leedahay ama aad nuujiso.**

Daawada qaaxada waxaad heli kartaa adiga oo aanan bixin wax lacag ah. Takhtarkaagu waxa uu la xiriiri karaa Waaxda caafimaadka oo uu kaaga codsan karaa daawada (612/676-5414).